

Sida loo Sameeyo

Intrivo On/Go COVID-19 Antigen Self-Test

TALLAABADA 1AAD. Ka helitaanka shaybaadhka goobta shaybaadka.

TALLAABADA 2AAD. Akhri dhamaan tilmaamaha la xidhiidha shaybaadhka.

TALLAABADA 3AAD. Isku baadh meel aan ahayn goobta shaybaadhka iyo sugitaanka 10-15 daqiiqo natiijada.

TALLAABADA 4AAD. Ka tabi natiijada [healthvermont.gov/reportresults](https://www.healthvermont.gov/reportresults) oo buuxi foomka gaaban.

Jawaabtaadu waa sir.



TALLAABADA 5AAD. Haddii caddayn muujinaysa natiijooyinka shaybaarkaaga loo baahdo, ka soo dejiso On/Go App. Waxaa muhiim ah inaad ka warbixiso natiijada shaybaadhkaaga.



Si aad u hesho tilmaamaha shaybaadhka iyo fiidyaw tilmaamo ah oo tarjuman, fadlan booqo www.healthvermont.gov/covid-19/testing

cic
Health


VERMONT
DEPARTMENT OF HEALTH

Su`aalaha Inta badan la Isweydiyo

Waa maxay Intrivo On/Go COVID-19 Antigen Self-Test?

Shaybaadhka Intrivo On/Go COVID-19 Antigen Self-Test waa lateral flow immunoassay oo loogu talo geley in lagu ogaado tayada antigen-ka borotiinka nucleocapsid ee ka yimaada SARS-CoV-2 ee shakhsiyaadka qaba ama aan qabin astaamaha ama sababo kale oo safmarka ah oo looga shakiyay caabuqa COVID-19 marka la baadhay laba jeer mudo sadex maalmood ah oo ugu yaraan mudo 36 saacadood ah shaybaadhada u dhaxayso. Shaybaadhkan waxaa loo ogolaaday in lagu isticmaalo guriga iyada oo aan dhakhtar qorin iyada la isticmaalayo muunadaha qoriga muunada sanko (dulka) gudihisa soke ee shakhsiyaadka 14 sano jir ama ka wayn ah, ama muunadaha qoriga muunada sanko gudihisa soke ee dadka waawayn qaadeen ee shakhsiyaadka da'doodu tahay laba sano jir ama ka wayn.

Sidee ayuu COVID-19 Antigen Self-Test loo barbardhigi karaa shaybaadhka molikiyuulaarka? Shaybaadhada antigen-ku waxay aad u khuseeyaan fayraska, laakiin uma wanaagsana sida shaybaadhada molikiyuulaarka oo kale. Waxa uu kani ka dhigan yahay in natiijada sheegaysa in cid laga helay caabuqa ay u badan tahay inay sax tahay, laakiin natiijada laga waayay meesha kama saarayo in uu qabo caabuqa.

Goorma ayuu shaybaadhkaygu dhici doonaa? Wakhtigan la joogo, shaybaadhku wuxuu dhacaa taariikhda ugu dambaysa ee bisha ku qoran kartoonkaaga (sida, Janaayo 2022 taasi oo ka dhigan Janaayo 31, 2022). Hase yeeshee, waxsoosaarka caafimaad ee hoos taga EUA, sida On/Go, FDA, kadib daraasayn badan, waxay oggolaatay in wakhtiga dhicitaanka kolba la kordhiyo. Booqo websaytka si aad u hesho faahfaahin dheeraad ah oo arag liiska kordhinta oo dhammaystiran www.letsongo.com/product-updates

Maxay labada shaybaadh ugu jiraan bushqadda? Sida uu dhigayo On/Go, shaybaadhku waxaa weeye mid aan dhakhtar qorin/qofku isagu iska qaadi karo oo ay dadku laba jeer iska qaadaan sadex maalmood ka badan iyadoo 24 saacadood (oo aan ka badnayn 48 saacadood) ay u dhaxayso shaybaadhada. Labada shaybaadh ee ku jira waxay u ogolaadaan shakhsiyaadka inay buuxiyaan isticmaalka lagu taliyay.

Maxay noqonaysaa hadii natiijada shaybaadhkayga laga helo? Hadii shaybaadhkaaga laga helo, waxa aad kaga warbixisaa linkiga ku qoran dhanka kale ee kaadhkan. Si aad u hesho tilmaamo dheeraad ah, booqo healthvermont.gov/covid19positive



Si aad wax badan uga ogaato Intrivo On/GO COVID-19 Antigen Self-Test, booqo www.letsongo.com/faq 3/1/2022